

HAGAHA WAALIDKA

KU DIB UGU NOQOSHADA MANHAJKA WAXBARASHADA CAAFIMAADKA IYO JIRKA, FASALLADA I ILAA I2

Gudaha Ontario, manhajka ayaa tilmaama waxa ay tahay inay ardaydu aqoon u lahaadaan oo ay samayn karaan dhammaadka fasal ama maado kasta.

Manhajka ayaa ka taageeraa ardayda si ay u horumariyaan xirfadaha iyo aqoonta ay ugu:



Fahmaan naftooda iyo dadka kaleba



Fikiraan si fiican, oo ay u sameeyaan oo ku horumariyaan xulashooyin caafimaad-qab ah



Horumariyaan iyo ay ugu haystaan xiriiryada caafimaad-qabka ah



Ahaadaan badbaado, jir ahaan iyo maskax ahaanba



Firfircoonaadan jir ahaan noloshooda oo idil oo ay koyayaan

Ka caawinta ardayda inay horumariyaan aqoonta iyo xirfadaha lagu badbaado ee caafimaad-qabka lagu noqdo ayaa qayb ka mid ah *Gaarista Heer Sare: Hadaf Dib loo Cusboonaysiyay oo ku Wajahan Waxbarashada Ontario*. Waxa dheeraad ah ka ogow ontario.ca/eduision.

MAXAY ARDAYDU KA BARAYAAN OO AY KA QABANAYAAN CAAFIMAADKA IYO WAXBARASHADA JIRKA?



ARDAYDA AYAA BARANAYSA SIDII AY U FAHMI LAHAAYEEN NAFTOODA IYO DADKA KALEBA

Ardaydada'dayarahayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Waxa ka dhigaya iyaga gaar iyo sida ay muhiimka u tahay inay ixtiraamaan oo fahmaan kala duwanaanta dadka kale
- Garashada, dejinta, la socodka iyo dheelitirka yoolasha shaqsiyeed ee adadkaanta jirka.

Ardayda waawaynayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Dhisidda fahamkooda caafimaadka maskaxda, iyo wax ka qabashada caqabadaha ay la kulmi karaan
- La shaqaynta dadka kale si ay ugu helaan xal arrimaha hadda ka jira caafimaadka iyo badbaadada (tus., khataraha anshax-xumo aalad isugu dirista marka gawaarida la wato).

Manhajka ayaan amrin sida baruha tahay inuu u baro waxa ku jira maadada ardaydooda. Barayaashu ayaa ku sameeya go'aamadaas iyada oo salka ku haysa baahida ardayda.

ubad kasta taageer
arday kasta gaarsii



ARDAYDA AYAA BARANAYSA INAY U FIKIRAAN SI MIISAAMAN, OO AY SAMEEYAAN OO HORUMARIYAAN DOORASHOYINKA CAAFIMAAD-QABKA

Ardaydada'dayarahayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Faa'iidooyinka yaraynta wakhtiga shaashadda iyo waqtiga dibad u bixidda oo la kordhiyo
- Dhaqanka nadaafadda, sida gacmo dhaqashada, ee laga hortago faafidda cudurrada.

Ardayda waawaynayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Samaynta cunto doorashooyin caafimaad-qab ah, iyada oo la tixgaliyo arrimaha ay ka midka yihiin qiimaha, helidda, nafaqada iyo arrimo kaleba
- Fahamka saamaynta isticmaalka khamriga, tubaakada, daroogooyinka sharci-darrada ah iyo dawooyinka la qoro ay ku yeelan karaan iyaga, iyo dadka kaleba.

Isticmaalka aadka u badan ee Internetka, warbaahin bulsheedka iyo teleefoonada shaashada laga maamulo ayay micnaheedu tahay inay ardaydu si joogto ah ugu xidhan yihiin- macluumaadka, asaaggooda, dunida.



ARDAYDA AYAA BARANAYSA INAY HORUMARIYAAN OO AY LAHAADAAN XIDHIIDHO CAAFIMAAD-QAB AH

Ardaydada'dayarahayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Xirfadaha wada shaqayn iyo wada xidhiidhka loo maro waxqabadyada jirka
- Siday tahay, ee loo fahmo ee loo dareemo ahaanta saaxiib wanaagsan iyo ka qaybqaadashada wada hadalka labada dhinac ah ee sii socda ixtiraamkana leh ee lala yeesho dadka kale.

Ardayda waawaynayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Oggolaanshaha gogol wadaagga, oo oggolaanshahaas ayaa u baahan wada hadal cad oo qasdi leh oo kaliya ka yimaad ogaanta xuduudahooda iyo u lahaanta ixtiraamka xuduudaha dadka kale.
- Muhiimadda is-ixtiraamka laftooda iyo dadka kaleba, dhammaan kala duwanaantooda - oo ay ka mid yihiin dhammaan aqoonsiyada jinsiga dadka oo dhan aqoonsiga jinsiga, u jeedka jinsiga, awoodaha maskaxda iyo jirka, iyo ka soo jeedyada bulsheed iyo dhaqameed.

Koritaanka Aadanaha iyo caafimaad-qabka gogol wadaagga ayaa ah qayb ka mid ah caafimaadka iyofayoqabka guud. Waxay ku lug leedahay isbarashada qof ahaan iyo dadka kaleba, iyo arrimaha ku saabsan xiriiriyada iyo xirfadaha bulsheed iyo shucuureed.



ARDAYDA AYAA BARANAYSA INAY BADBAADOKU AHAADAAN, JIR AHAAN IYO MASKAX AHAANBA

Ardaydada'dayarahayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Dhegaysiga iyo u muujinta ixirraamka markay dadka kale weydiistaan inay joojiyaan waxay samaynayaan
- Samaynta wax kala doorashooyin nabad ah, sida xidhashada koofiyadda adag ee madaxa lagu badbaadiyo, marka baaskiilka la wato.

Ardayda waawaynayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Saamaynta bulsheed, shucuureed iyo sharciyeedba marka lagu dhejiyo ama la gudbiyo sawirrada qaawan ee gogo wadaagga ku lug leh (anshax-xumo aalad isugu diris)
- Iska ilaalinta khataraha markay firfircoonida u joogaan meelaha dibadaha ah.

Waalidiinta, ardayda, macallimiinta iyo beesha ayaa wada shaqeeya, oo wax u taro waxbarashada iyo fayo-qabka ardayga.



ARDAYDA AYAA BARATA INAY JIR AHAAN FIRFIRCOONAADAAN CIMRIGOODA OO IDIL OO AY KORAAN

Ardaydada'dayarahayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Ugu dhaqaaq si kalsooni iyo xirfad leh waxqabayada kala duwan ee jirka
- Inay jir ahaan u firfircoonaadan si ay wax ugu biiriyaan caafimaadkooda iyo fayo-qabkooda, oo ay wakhti fiican qaataan, samaystaana saaxiibbo oo ay maareeyaan kurbadooda.

Ardayda waawaynayaabartaarrimaha ku saabsan:

- Doorashada waqabadyada jirka maalin kasta ah ee ay jecelaystaan ee kartidooda ku habboon nolol maalmeedkoodana ku qiyaasaan, oo kana caawinaya la kulanka yoolashooda ad-adkaanta jirka
- Iyaga oo isticmaala waxay yaqaaniin, si ay caafimaad-qab iyo firfircooni u noqdaan, oo ay u noqdaan kuwo ay ku daydaan kuwa kale.

MANHAJKA WAXBARASHADA CAAFIMAADKA IYO JIRKA: FIIRO DHOW

Manhajka Waxbarashada Caafimaadka iyo Jirka ayaa hagaha macallimiinta kolba markay ay ka caawinayaan ardayda oo dhan inay helaan xirfadaha iyo aqoonta ay ugu baahan yihiin sidii ay ugu noolaan lahaayeen nolol caafimaad-qab iyo firfircooni leh. Horumarinta manhajka waxa warqab lagaga noqday cilmi-baaris, talooyin laga helay aqoonyahanno iyo khubaro ka soo jeeda dhinacyo badan oo daraasado ah (oo ay ku jiraan caafimaadka dhimirka, caafimaadka dadwaynaha, caafimaadka gogol wadaagga, waxbarashada jirka, cilmiga dhaqdhaqaaqa dadka) iyo wadaha lala yeesho waalidiinta, macallimiinta iyo ardayda.

Manhajka waxaa ka mid ah:

- **Qaybta hordhaca ah**, oo leh macluumaad ku saabsan manhajka lafteeda, qiimaynta waxbarashada ardayga iyo qorshaynta barnaamijka.
- **Ka filashada Waxbarashada**, aqoonta iyo xirfadaha ardayda laga filayo inay bartaan oo ay karti u yeeshaan inay sameeyaan dhammaadka fasal ama maadada.
- **“Hoggaaminta” ikhtiyaariga ah** (tus., su'aalo macallimeed tijaabo ah, jawaabaha arday) iyo **tusaalooyin** oo macallimiinta ay u isticmaali karaan qorshaynta casharrada iyo waxbaridda, iyo u jaangoynta waxbarashada si ay ula kulanto baahida waxbarashada ardayda ee shaqsiga u gaarka ah. Hadal isweydaarsigan namuunadda ah ayaa ka caawin doona ka jawaabida su'aalaha, jawaabay su'aalo, ugu fikira degdeg ah aragtiyo kala duwan oo bixiya tusaalooyin dheeraad ah oo ku saabsan waxay ardaydu baranayaan.
- **“Xirfadaha Noolaanta”** ayaa lagu daray manhajka oo idil. Waxaa ka mid ah barashada ku saabsan wacyi isku lahaanta iyo xirfadaha la qabsiga; xirfadaha bulsheed iyo xirfadaha wada hadalka loogu talagalay xiriiriyada caafimaad-qabka ah; iyo siyaabaha lagu xalliyo dhibaatooyinka, ee loo dejisto yool iyo sida go'aamada loo samaysto. Tusaale ahaan, summadda, [CT] ayaa muujinaysaa inuu macallinka ku nuuxnuuxsanayo gaar ahaan inuu ka caawiyo ardayda sidii ay uu horumarin lahaayeen dheellitiritaanka fikirka iyagoo markaas baranayaan arrimo ku saabsan waxyaabaha ku kicinaya ka qaybgalka dhaqdhaqaaqa jirka.
- **Dulmarrida Qaybta** loogu talagalay fasallada 1-3, 4-6 iyo 7 & 8 ee bixiya macluumaadka ku saabsan baahida kobcistaaneed ee ardayda iyo soo-koobyada ka filitaanka waxbarashada.
- **Lifaaqyada** oo ay ka mid yihiin jantuusyada soo koobaya waxbarashada iyo erey-bixinta qeexidda ereyada cilmi-baadhista ku saleysan.



Tusaaleahaan, Fasalka 6, ardaydaayaa:

- A1.3** sifee arimaha ku dhiirigeliya iyagu inay ka qaybqaataan dhaqdhaqaaqa jirka maalin kasta, marka la joogo dugsiga iyo wakhtiga firaqada, oo saameeya xulashadooda waxqabadyada (tus., saamaynta saaxiibbada, xiisaha ay u qabaan dibadaha, doorbidka ay u leeyihiin waxqabadyada shaqsiga ama kooxda midkood-ba, dhiirigeliya inay ka helaan dadka kale, la qaadasho wakhti saaxiibada oo kordhay, helitaanka iyo awoodda dhaqaale ee barnaamij, jecleysiga tartanka caafimaad-qabka ah, saamaynta kuwa doorka ku dayashada leh ee warbaahinta) [CT]

Hoggaamin macallin, “Sidee ayay saamaynta ugu leeyihiin waxa dhiirigelinta kuu siya inaad firfircoonaato waxaad doorato inaad sameyso?”

Ardayda: “Waxaan runtii aad u jecelahay dibadaha, markaa waxaan xushaa waxqabadyada fursadda ii siya in aan dibadda u baxo. Waxa jira naadi cusub oo waxqabadyada lugaynta iyo dibad tagitaanka la bilaabay wakhtiga qadada. Saaxiibaday midkoodna kuma biirayaan, laakiin waxay u egtahay mid xiiso leh, oo waxa laga yaabaa inaan la kulmo qof cusub.” “Waxaan bartaa ciyaar dhaqameed sababta oo ah waxaan rabaa inaan barto wax xiriir la leh dhaqankayga.” “Waxaan jecelahay inaan tartamo oo waxaan jecelahay koox isboortiyada iyo waxqabadyada. Qaar badan oo ka mid ah ciyaaraha kooxda, sida kubadda cagta, ayaa laga heli karaa beeshayda.” “Ma jecli inaan isboortiyada kooxda, laakiin waxaan jecelahay inaan la shaqeeyo dadka kale. Waxaan la kaxaystaa doonidaa (kayak) habaryartey maalmaha usbuuc dhammaadka ah oo, mar kasta oo aan awoodo, waxaan saaxiibadayda u raacaa goobta iskeed-boordhka.”

SIDEE BAAD KU CAAWIN KARTO WAXBARASHADA IYO FAYO-QABKA ILMAHAAGA

Qoysaska iyo dugsiga ayaa labaduba ku leh kaalin muhiim ah taageerada waxbarashada iyo fayo-qabka ardayda. Tixgelinta soo socda laga soo qaatay ilaha ay diyaariyeen waalidiinta (Ka eeg Ilo dheeraad ah hoosta).

Ka qaybgalka

- Ka fikir waxaad wada samayn kartaan ee madaddaalada leh oo waliba taageeraysa caafimaadka (tus., dhaqdhaqaaqa jirka, samaynta cuntada).
- U dhageyso si feejignaan leh.
- Uga jawaab su'aalaha hab run, oo toos ah.

Ahaanta wax barte

- Weydii ilmahaaga iyo macalimiinta ilmahaaga arrimaha ku saabsan waxa ay ku baranayaan dugsiga.
- Baro waxyaabaha aasaasiga ah ee ku saabsan sida ammaan loogu noqon lahaa si toos ah, gaar ahaan marka la isticmaalayo warbaahinta bulsheed.
- Raadi adeegyada beesha iyo ilaha laga heli karo degaanka (tus., madaddaalada, dhimirka adeegyada caafimaadka).

Ahaanta qof lagu daydo

- Ka fikir aragtiyadaada aad adigu qabto oo weydii carruurtaada su'aalo si ay kula wadaagaan aragtidooda.
- Ka fikir saamaynta aad ku leedahay carruurtaada (tus., markaad ka gudbaysa waddada, baabuur wadidda, cunto kala doorasho samaynta).

Ahaanta Hage

- Ka caawi ilmahaaga si uu u fahmo wuxuu ku fiican yahay oo u deji yoolal.
- Ku dhiirigeli gaadiidka firfircoon, markay suurtagal tahay (tus., lugayn, baaskiil wadasho).
- Ka caawi ilmahaagu inay aqoonsadaan dareenkooda iyo wax kurbada u leh iyaga, oo ka caawi iyaga si ay u helaan siyaabo ay ku maareeyaan.



ILAHA WAALIDKA

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida aad ku taageeri karto waxbarashada ilmahaaga:

- Eeg qaybta waalidka ee manhajka Waxbarashada Caafimaadka iyo Jirka.
 - » Manhajka dugsiga hoose: www.edu.gov.on.ca/eng/curriculum/elementary/health.html
 - » Manhajka dugsiga sare: www.edu.gov.on.ca/eng/curriculum/secondary/health.html
- Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan koritaanka ilmaha iyo dhallinyarada (bulsheed, shucuureed, jidheed, dhimireed) iyo waxay dadka qaangaadhka ahi ka qaban karaan inay taageeraan dadka dhalinyarada ah, ka eeg:
 - » *Warbixinta Buuxda ee Qaab-dhismeedka Waxbarashada Hore* (loogu talagalay carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa 8 sano jir) www.edu.gov.on.ca/childcare/oelf
 - » *Stepping Stones, il ku saabsan koritaanka dhallinyarada* (loogu talagalay dhalinyarada, da'da 12 illaa 25) www.ontario.ca/steppingstones
- Manhajka Waxbarashada Caafimaadka iyo Jirka ee ku yaal barta internetka Wasaaradda Waxbarashada ka hel xiriirin ku geysa:
 - » *Hagaha Waalidka: Horumarka Aadanaha iyo Caafimaadka Gogol Wadaagga ee ku jira manhajka Waxbarashada Caafimaadka iyo Jirka, Fasallada 1-6 iyo 7-12*
 - » Xaqiiqooyinka Dhakhsaha leh ee loogu talagalay waalidiinta
- Ilo Dheeraad ah
 - » *Dhisidda Xiriirada Caafimaad-qabka ah iyo Dhisidda Ka Qaybgal Waalid*, laga heli heli karo www.ontariodirectors.ca/parent_engagement.html
 - » People for Education (Dadka Loogu Talo Galay Waxbarashada) www.peopleforeducation.ca
 - » Ontario Association of Parents in Catholic Education (Ururka Waalidiinta Ontario ee Waxbarashada Katooligga) www.oapce.on.ca/oapce
 - » Ontario Federation of Home and School Associations (Iskubiirka Ururrada Guryaha iyo Dugsiga ee Ontario) www.ofhsa.on.ca
 - » Parents partenaires en éducation www.reseaupe.ca